

Mashruuca DeafBlind ee Minnesota wuxuu la shaqeyaa qoysaska iyo barayaasha si ay u taageeraan dhallaanka, carruurta, iyo dhallinyarada aan qabin maqalka iyo aragga labadaba ee qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah, ilaa da'da 22. Anaga oo siinayna taageerada horumarinta xirfadeed iyo kaalmada farsamada, waxaanu ka caawinaa iskuulada inay horumariyaan natiijooyinka waxbarashada ardaydooda ah DeafBlind.

Mashruuca DeafBlind ee Minnesota wuxuu aaminsan yahay muhiimada ay leedahay in qoysasku bartaan wax kasta oo ay awoodaan ee ku saabsan maqal la'aanta iyo arag la'aanta isku dhafan. Waxaan siinaa taageerooyin beegsi ah qoysaska iyada oo loo marayo wicitaano muuqaal ah/taleefoon iyo fariimaha qoraalka ah, wadaagista agabka, fursadaha tababarka, iyo kobcinta ku xirka shabakada DeafBlind iyo bulshada.



**Minnesota DeafBlind Project  
BrightWorks**  
2 Pine Tree Drive, Suite 101  
Arden Hills, Minnesota, 55112

**Email:** [mndbproject@brightworksmn.org](mailto:mndbproject@brightworksmn.org)  
**Khadka bilaashka ah:** 800-848-4905  
**Taleefanka:** 612-638-1505  
**Fakis:** 612-706-0811



**I ISKAAN  
GARAYSO**

Mashruuca DeafBlind ee Minnesota waxaa maalgeliya deeq ka timid Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Isha deeqdu waxay ka timid deeq federaalka ee - 84.326T, H326T230026 PL 108-446 PT. D IDEA. Waxbarashada Gaarka ah Caawinta Farsamada iyo Faafinta si loo Hagaajiyo Adeegyada iyo Natiijooyinka Carruurta Naafada ah.

© 2023 Minnesota DeafBlind Project



**Taageerada loogu  
talagalay dhallaanka,  
carruurta iyo  
dhallinyarada ee leh  
dhego la'aanta iyo  
indho la'aanta isku  
dhafka ah**



**Mashruuca  
DeafBlind ee  
Minnesota**



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadayada ama indho iyo dhego la'aanta, soo booqo websaydkeena:

[www.dbproject.mn.org](http://www.dbproject.mn.org)

Shaqaalaha Mashruuca DeafBlind ee Minnesota ayaa kaa caawin kara inaad fahamto sida dhego la'aanta iyo indho la'aantu u saamayso awoodda waxbarashada ee ilmaha. Waxaan ku tusi karnaa hababka ugu fiican ee wax loo baro ilmaha DeafBlind ah. Oo, waxaanu kugu xiri karnaa agabyo kaa caawinaya korinta ama waxbaridda ilmaha leh maqal la'aan iyo arag la'aanta.

## Adeegyadeena:

Dhammaan adeegyada waa u bilaash qoysaska iyo barayaasha, marka laga reebo tababarrada qaar ee barayaasha loogu talagalay.

- **Kaalmada Farsamada**  
*Kaalmada farsamada waa ereyga dawladda federaalku ay u isticmaasho si ay u qeexdo qaar badan oo ka mid ah adeegyadeen si aan u taageerno natiijooyinka sii wanaagsanaada ee DeafBlind carruurta iyo dhallinyarada. Adeegyadan way kala duwanyihiin, iyadoo ku xiran hadba baahida cayiman ee ilmo kasta.*
- **Tababarrada loogu talagalay Barayaasha iyo Qoysaska**  
Waxaan bixinaa tabobarro ku saabsan mowduucyo la xiriira indho iyo dhego la'aanta. Mawduucyadu waxay u dhaxayn karaan xeeladaha wada xiriirka ilaa fahamka saamaynta cilladaha gaarka ah.

- **Tababarka qofka wax ka qabanaya**  
Iyadoo lala kaashanayo Mashaariicda Minnesota ee Low Incidence Projects, waxaanu bixinaa aqoon-is-weydaarsi ballaaran oo loogu talagalay wax ka qabtayaasha mid ula shaqeyna ardayda Indho iyo Dhego la'. Wax ka qabtayaashu waxay bixiyaan galaangal muhiim ah iyo la xiriirinta dadka kale iyo aduunka ku xeeran.
- **Tirinta Carruurta ee Sannadlaha ah**  
Waxaan samaynaa tirakoobka loo baahan yahay ardayda ku haboon qeexida federaalka ee indho iyo dhego la'aanta.
- **Shabakadda Taageerada Qoyska**  
Waxaan qoysaska ku taageeranaa wicitaano iyo kulamo hal-hal ah iyo, iyadoo la samaynayo wadaaga khayraadka, bignig sanadle ah, goob u dalxiis loogu talagalay hooyooyinka, kooxda Facebook loogu talagalay qoysaska, iyo hawlo kale.
- **Xarunta Ilaha Qalabka**  
Waxaan haynaa maktabad wax laga amaahdo oo haysa agabka indho iyo dhego la'aanta iyo maktabada amaahinta qalabka caruurta ku ciyaarto ah oo loogu talagalay qoysaska

